

## Tilmaamaha bukaanka Shaybaadhka kaadida - koobka ururinta


### WAXA AAD U BAAHANTAHAY

Koobka ururinta ee uu ku siiyay daryeelbixiyuhu.

### SIDAN SAMEE




Qaaditaanka saambalka kahor waa in aadan kaadi tagin 4 saacadood.



Marka Saambalka la qaadayo:


**Dumar** : Kala qabo dabnaha siilka.  
Haddii dhiig ama dareere yimaado waxaad galisaa tamboong siilka saambalka ka hor.  
**Rag**: Buuryada dib u celi.



- 1) Daboolka ka fur koobka.
- 2) Waxyar marka hore ku kaadi musqusha.
- 3) Koobka ku kaadi oo kala badh koobka buuxi.
- 4) Musqusha ku dhamaystiro kaadida.
- 5) Daboolka ku xidh koobka.



Ku calaamadee koobka personlambarkaaga oo idil, magaca, taariikhda iyo wakhtiga. Isticmaal sumadda uu ku siiyay daryeelbixiyagaagu.



Ku kaydi koobka tallaajada ama bac baraf ku jiro.



U gudbi koobka daryeel bixiyahaaga ugu danbayn maalinta aad qaaday saanbalka. Ku qaad koobka bac baraf ku jiro. Soo qaado kaadh aqoonsi oo sax ah.